



## DIB U SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Isku dayida in la helo dadka ka dibna lala xiriiryo qaraabadooda waxay ICRC, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed(SRCS), shabakadda Jimciyad-Qarameedyada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas, mutadawiciinta gobolka iyo dunida oo dhan ku tahay dhib weyn.

### OGOW QADDARKOODA KA DIBNA HEL


Maalin kasta waxaan markhaati ka nahay sida xiriirka qoyska lumaayo ay nasiib xumo u tahay oo ay saameyneysyo malaayiin dad ah. Inta lagu guda jiro khilaafka, kuwo badan ayaa lumaan iyagoo ka baxsanaaya rabshadaha. Kuwa jilicsan sida caruurta, haweenka, iyo dadka waayeelka ah kama badbaadayaan khatarta ay kaga lumayaan qoysaskooda. ICRC waxay horumarisay qalab kugu caawimaaya in aad hesho.

#### DIB-U-SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Maanta oo aan xuseyno Maalinta Dadka Lumeen, waxaan aaminsanahay in weli ay jirto rajo ah in laga heli karo. Maalin walba xafisyyadeena adduunka oo dhan waxaan codsiyo gargaar ah ka helnaa dadka raadinaaya qaraabadooba ka maqan.

Soomaaliya, marka aan qaabilno qoys kana helno macluumaad shakhsiyadeed anagoo si wadajir ah ula shaqeeyeyno Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxaan la hawlgalhaa bulshooyinka si loo ogaado halka suurto galka ah qofka uu joogo. Waa safar ay qaadan karto sanooyin laakiin waxaan dooranaa in qoysaska aan la jirno inta hawsha socoto oo dhan.

"Ma qiyaasi karo xanuunka iyo cadaabta haysto qoysaska lumiyeen xiriirka. Maanta waxaan muujincaa naxriisteeda waxaana xusuusincaa in aan halkaan u joogno sidii aan u caawimi laheyn," waxaa sidaa yiri Axmed Zaroug, Isuduuhaha ICRC Soomaaliya ee dib- u- soo celinta xiriirka qoyska. Iyadoo loo maraayo barnamijiyadeena Dib-u-Sox celinta Xiriirka Qoyska waxaan isku



Diiwan ku qoran liis wicitaano telefoonoo oo qaraabo raadinaaya xubnaha qoyskooda ku waceen Soomaaliya.

daynaa in aan ku caawino sidii ay u ogaan lahaayeen qaddarka ku dhacay kuwa ay jecelyihiin iyagoo rajo ka qaba in ay heli karaan xoogaa raaxo ah.

Dhanka Cabdiraxman Cabdi Cigale, wuxuu doortay in waqtiga aan ka fakarin. Wuxuu rabay in uu ogaado waxa ku dhacay gabadhiisa. Tuulo ku taalo Janaale halkaas oo la noolaa qoyskiisa, gabadhiisa waxay u soo dhaqaqaqday dhanka Muqdisho si shaqo u raadsato. Waqtigan la joogo wuxuu ugu yeera 'bilowgii kala go'eenaa.'

Markii uu dagaalka ka qarxay Muqdisho, waxay qoyska saaxibkey u raacday Kenya. Nasiib daro saaxibkey in yar ka dib markii uu gaaray Kenya wuu dhintay, waxaan lumiyeen xiriirka gabadheyda'sidaa waxaa yiri Cabdiraxmaan oo hadda ku nool xero barakac oo ku taalo Muqdisho.

26 sano ka dib oo ay kala maqnayeen ayaa sanadkan 2016-ka la hadlay gabadhiisa

way ku mahadsanyihiin shaqada aan laga daalin ee saaxibadeena iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed. Kenya waxay uga sii haajartay Ameerika, Cabdiraxmaan wuxuu yiraahdaa 'waxaan leeyahay dareen farxadeed'.

Waqtiyada ka soo wareegatay xanuunka iyo cadaabta ay soo mareen aabaha iyo gabadha waxaa laga arki karaa ooyinta Cabdiraxmaan oo hadli kari waayey gabadhiisa. 'Waxaan aaminsanahay in mar kale kulmi doono'ayuu yiri. Hadda wuxuu codsanaaya in loo sameeyo dib u midoobid.

Intii u dhaxeysay bilaha Jannaayo iyo Juun ee sanadkan in ka badan 15,000 qoysas ayaa awoodeen in ay la xiriiraan qaraabodooda jooga Soomaaliya iyo dibadda.

#### TRACE THE FACE.

Yurub gudaheeda, ICRC iyo ururada Laanqeyrta Cas waxay abuureen qalab online ah. 'Trace the Face' wuxuu muhaajiriinta iyo qoyskooda ku caawimaaya in midba midka kale dib isugu-xiro.

Haddii aad lumisay xiriirka qaraabo u haajaray Yurub, waxaad isticmaali kartaa website-kan si aad u aragto haddii ay soo dhigeen sawiradooda oo adiga ku raadinaayaan. In ka badan 1,400 qof ayaa bartan durba soo dhigay 'WEJIYADOODA', 94 waa Soomaali.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya boopo [www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)